



## Heshiis Dhexmaray Dowlad Goboleedyada Kumeel gaarka ah ee Jubbaland iyo Koonfur Galbeed

**Hordhac**

**December 29, 2014**

Waxaa booqasha rasmi oo qaadatay sadex maalmood ku yimid magaalada Kismaayo ee Dowlad Goboleedka Jubbaland wafdi heer sare ah oo uu hoggaamineyey Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed **Mundane Sharif Hassan Sheikh Aden**. Waxaa Madaxweynaha booqashadiisa ku waheliyey 30 xubnood oo isuguna jiray Siyaasiyiin, Hogaamiye dhaqameedyo iyo Ururada bulshada ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed. Waxaa Madaxweynaha iyo wafdigiisa Magaalada Kisimayo ku soo dhaweeleyey Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Jubbaland iyo xubno Golahiisa wasiirada kamid ah oo ay wehiliyaan Hogaamiye dhaqameedyo iyo ururdada Bulshada. Laba maalmood oo wada tashi dhinacyo badan taabanayey oo ay wada yeeshen labada dhinac kadib waxa gabagabadii la isku afgartey arrimaha soo soda:

### A. Heshiis Isafgarad ah ee labada Dowlad Goboleed isla gaareen

Waxay ugu horayn labada Madaxweyne Dowlad Goboleed baaq mahad celin ah u dirayaan Madaxweynaha Dowlada Federalka Somaliya sida masuuliyada iyo xil kasnimada leh ee uu xooga u saarayo gaarista Hiigsiga 2016 oo muhiimad weyn u leh dadka iyo dalka Somaliyed . Sidoo kale waxay mahad celin u gudbiyeen dowladaha IGAD, dowladaha dariska ah, Amisom, UN, US, EU, Jamacada Carabta iyo ururka Islaamka doorka ay ka qateen badbaadinta dadka iyo dalka Somaliyed taas oo aan marna suuro gal noqoteen in horumarka maanta lagaaray iyo kan la hiigsnayo.

Iyadoo laga faa'iidaysanayo dhaqanka dhaw, walaalnimada iyo darisnimada labada shacab iyo labada Dowlad Goboleed wadaagaan ayaa labada dhinac waxay isku afgarteen in xiriir dhincayo badan taabanaya la yeesho la iskana kaashado arimaha siyaasada, amniga, , Ganacsiga, Federalismka iyo Dastuurka.

#### 1. Arimaha Siyaasada (Higsiga cusub ee 2016)

- a. Waxa labada dhinac soo dhawaynayan Magacaabiste Ra'iisulwasaraha Cusub Mr Omar Abdirashid
- b. Waxa labada dhinac isku afgarteen in ay hal aragti ka yeeshan dardar galinta iyo hirgalinta arimaha Federalka iyo dib u eegista dastuurka.
- c. Waxa labada dhinac ku baqayaan in Dowlad Gobleedyadu isugu yimaadan shir lagaga wada tashanayo arimaha siyaasada dalka waxii kaga aadan Dowlad Goboleedyada.
- d. In labada Dowlad Goboleed si wada jir ah uga wada shaqeeyan sii xoojinta xirirka labda shacab iyo labada Dowlad Goboleed wixii tabasho/cabasho ahna ee yimaadana lagu xaliyo wada hadal iyo isafgarad.

- e. In Hogaamiye dhaqameedyada labada dhinac wada hadal iyo wadatashi ka yeeshan mar walba wixii tabasho ee yimaada iyadoo la racayo habka dhaqanka iyo xeerarka beelaha.
- f. In xaduuda labada dowlad Goboleed uu yahay kii jiray ka hor 1991 ee ay wadaagi jireen Gobolada labada Dowlad Goboleed ee xaduudka Wada leh.
- g. Waxay sidoo kale labada dhinac isku afgarteen in awood qaybsiga beelaha labada dhinac uu noqdo mid ay u wada dhanyahiin dadka deegaanka, isuna dheelitiran islamarkaana ku salaysan caddaalad iyo miisaanka degmooyinka iyo tuulooyinka beelaha dega labada dhinac.
- h. In hiigsiga 2016 lagu baahiyio Dowlad Goboleedyada si dadwaynaha Dowlad Goboleedyadu u fahmaan ugana qayb qaataan qorshahan.
- i. In Dowlada Federaalka iyo Dowlad Goboleedyadu aragti hore oo midaysan ka yeeshan mustaqbalka siyaasadeed ee wadanka hadii Higsiga 2016 wax iska badalan.
- j. In Dowlad Goboleedyada jira iyo kuwa ku soo biiri doona si wada jir ah u sameystaan Gudi isku dhaf ah oo ka shaqeeya danaha Dowlad Goboleedyada.
- k. In si wada jir ah loogu dhiiri geliyo dadka u dhashay labadan Dowlad Goboleed ee degan xeryaha qaxootiga, Barakacayaasha iyo qurbaha in ay ku soo laabtaan deegaankoodii.
- l. In mucaawinooyinka lagu helo magaca Soomaaliya si isu dheelitiran loogu qaybiyo Gobolada iyo deegaanada Soomaaliya.
- m. In Wasaradaha heer Federaal u sahlaan Hay'adaha caalamiga ah in ay si toos ah u caawin karaan Dowlad Goboleedyada (No Objection policy)
- n. In la dhamaystiro waxyabaha muhiimka u ah hirgalinta hiigsiga 2016 sida dhamaystirka dib u eegista dastuurka, arimaha Federalka iyo Hay'adaha la xirrira fulintooda.
- o. In dib u eegista lagu samayn doono Dastuurka lagu qeexo maqaamka ay yeelanayaan Madaweyneyaasha Dowlada Goboleedyadu dhanka maamuuska dowladnimo.
- p. In Dowlada Federaalka iyo Dowlad Goboleedyadu wada hadal ka yeeshan sida awoodaha iyo khayraadka waddanka loo qaybsanayo.(Power and resource sharing)

## **2. Arimaha Amniga iyo Ciidamada:**

- a. In la qabto shirweyne ay isugu imaanayaan Dowlad Goboleedyada jira iyo Dowlada Federaalka ee Somaliya si looga wada tashado arrimaha Ciidamada Soomaaliya iyo isku dhafkooda iyadoo la kaashanayo beesha caalamka.
- b. In la abuuro Gudi isku dhaf ah oo Amni oo si joogta ah uga wada shaqeeya arimaha Amniga labada Dowlad Goboleed
- c. In Ciidamada Qaranka Somaliyeed ay noqdaan mid ay Somalidu u dhantahay, kadibna lagu baahiyio Somaliya oo dhan
- d. Waxay labada dhinac ku heshiyeen in si wada jir ah isaga kaashadan Ladagaalanka argagaxisada caalamiga iyo ururka Alshabab islamarkaana la is dhaafsado waxii xog ah ee la xiriira cadowga
- e. In cidii danbi kasoo gasha mid kamid ah labada Dowlad Goboleed dib loogu celiyo Dowlad Goboleedkii uu danbiga ka soo galay qofkaasi si halkaas sharciga loo horgeeyo.
- f. In la is dhaafsado aqoonta tababarada ciidamada booliska.

- g. In dhamaan tababarada ciidamada heer Federal ay noqdaan kuwo loo siman yahay lana gaarsiyo Dowlad Goboleedyada jira.
- h. In wadamada dariska ah kawada shaqeyno arimaha amniga xaduuda labada wadan wadaagaan.

### **3. Arimaha Federaalka iyo Dastuurka**

- a. Waxa la soo dhaweeeyey hanaanka geedi socodka iyo dardargalinta fulinta arimaha Dastuurka ee Dowlada dhexe hormuudka ka tahay.
- b. Waxay labada dhinac is la qaateen in talaabo qaadka horeba dowlada Federaalka iyo Hay'adaheeduwa wada tashi dhab ah kala yeeshaan Dowlad Goboleedyada arin kasta oo saamayn ku yeelan karta nolosha iyo mustaqbalak Dadka ay matalaan.
- c. In markasta oo xeer cusub ay qorayayaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Federaalku ay xaqijiyaan in fikradaha iyo talada Dowlad Goboleedyada la helo inta aan Golaha Wasiirada iyo Baarlamaanka Federaalka loo gudbinin Xeerkaas.
- d. In dhamaan xeerarka (bills) hada horyaala Golaha Shacabka ama Wasiirada ee ah in ay ka doodaan kadibna ansaxiyaan ee aan horey looga talogelinin Dowlad Goboleedyada iyo Ururada Bulshada rayidka ah in fursad loo siiyo in ay taladooda ku biiriyaan si loo xaqijiyo lahaansho dhab ah ee geedi socodka Higsiga 2016.
- e. In si dhaqso ah loo aasaaso Hay'ada isku xirkha Dowlad Goboleedyada iyo Dowlada dhexe (Interstate Commission) taas oo muhiim u ah sii amba qaadida iyo dardar galinta arimaha Federaalka.
- f. In Dowlad Goboleedyadu soo magacowdaan wakiiladooda uga mid noqonaya Hayada Madaxa banaan ee dib u eegista iyo fulinta Dastuurka iyo sidoo kale Gudiga Kormeerka dib u eegista Dastuurka sida ku cad Dastuurka qodobka 133 farqadiisa 2 xarafkiisa (a) iyo qodobka 134, farqadiisa labaad.

### **4. Arimaha Ganacsiga**

- a. In la fududeeyo isu socodka iyo iswaydaarsiga Ganacsiga labada shacab iyadoo ay arintaas hormuud ka noqon doonan labada Rug Ganaci ee labada Dowlad Goboleed
- b. In canshuur dhimis loo sameeyo Badeecoyinka ku socda Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed ee ka soo dega Dekada Kismayo.

Heshiiskan is afgaradka ah waxaa wada saxiixay

Mudane Sharif Hassan Sheikh Aden

Madaxweyamaha Dowlad Goboleed  
Meelgaarka ah ee Koonfur Galbeed Soomaaliya



Mudane Ahmed Mohamed Islam

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka ku  
Meelgaarka ah ee Jubbaland Soomaaliya

